



## Farriin kusaaban goobaha cuntada laga qaadanayo

Qoysaska PPS ee Sharafta leh,

Innagoo kujirna toddobaadkii saddexaad ee intii dugsiyada la xiray faafidda coronavirus dartii, waxaannu ku faraxsannahay inaanu awoodno inaanu siino cunto ardaydeena mar labaad, laga bilaabo Isniinta, 30 Maarso. Sidii aannu yeelnay toddobaadkii u horreeyey ee hakinta dugsiya, waxaannu samaynaynaa jawaanno quraac iyo qado ah oo loogu talagalay in dibadda loo qaato 15 dugsiyadeena kamid ah. Sidoo kale, toddobo ka mid ah goobahan ayaa hadda ku jira adeegyo cunto qaybinta toddobaadkiiba mar loogu talagalay qoysaska u baahan xirmooyin iyo waxyaabo kale oo aan u adeegsan jiray in lagu bixiyo goobaha PPS iyo SUN.

Goobaha dugsiya waxay furnaan doonaan Isniinta ilaa Jimcaha, 11 g.h. ilaa 1 g.d. Waxa weeye (goobaha cunto qaybinta waxa lagu calaamadiyey \*; [halkan guji si aad u aragto waqtiyada iyo maalmaha](#)):

- Boise-Eliot/Humboldt Elementary - 620 N Fremont Ave
- César Chávez Elementary - 5103 N Willis Blvd
- George Middle School - 10000 N Burr Ave
- Grout Elementary - 3119 SE Holgate Blvd
- Harrison Park School - 2225 SE 87th Ave
- \*Lent School - 5105 SE 97th Ave
- \*Dr. Martin Luther King Jr. Elementary - 4906 NE 6th Ave
- Rigler Elementary - 5401 NE Prescott St
- \*Rosa Parks Elementary - 8960 N Woolsey Ave
- \*Scott Elementary - 6700 NE Prescott St
- \*Sitton Elementary - 9930 N Smith St
- \*Woodmere Elementary - 7900 SE Duke St
- Markham Elementary - 10531 SW Capitol Hwy
- Madison at Marshall - 3905 SE 91st Ave
- \*Franklin High School - 5405 SE Woodward St

Toddobaadkii u horreeyey ee xirnaanshaha dugsiya, waxaannu u qaybinay 30,600 oo cunto qoysaska muddo afar maalmood ah. Waxaannu ka shaqaynaynay inaanu dib u soo buuxino kaydka cuntada, annagoo diiradda saarayna shayada aadka ugu habboon qaabkayaga si-dhib-yar-u-qaadashada kaasi oonnu isticmaalayno si aannu u fulino tilmaamaha isbaddalaya, ee xaddidnaanta badan ee ay dhigeen maamulada caafimaadka iyo hoggaamiyayaasha la doortay. Goobahayaga waxa lagu aasaasay annagoo xasuusan ku-camalfallada kala fogaanta dadka ee la amray. Waxaannu u sheegaynaa qoysaskayaga, marka ay cuntada qaadanayaan, inay xasuusnaadaan kala fogaanshaha dadka, sidoo kale.

Fadlan ogow ku xoojinta meelaha cuntada lagu bixiyo goobaha cuntada lagu qaybo waxay ka

dhigan tahay in meelaha cuntada lagu bixiyo ee hore ay xiran yihiin, xiitaa kuwan ku yaala dugsiyada ee ah meelo cuntada laga qaadan karo. Goobaha cunto bixinta ee ku yaala ridger, César Chávez, Harrison Park, Kelly, Lane, Madison ee Marshall, Roosevelt iyo Woodlawn waa la xiray. Meelaha cuntada lagu bixiyo waxay bilaabeen cunto qaybin ka timi Kaydka Cuntada Oregon iyagoo kaashanaya saaxiibada bulshada ay ka mid yihiin Immigrant and Refugee Community Organization, Latino Network, Portland Parks & Recreation, iyo Self Enhancement Inc.

Goobaha cuntadu sidoo kale waxay yeelan doonaan bushqado waxbarasho oo la qaadan karo, bushqadaha farshaxankuna waxay diyaar noqon horraanta toddobaadka.